

# XANUUNKA MISIGTA

**CAADO  
XANUUN  
BADAN LEH**

**XANUUN AAD DAREENTO  
MARKA AAD KAADINAYSO  
DAAL**

**XANUUN AAD DAREENTO MARKAAD  
SAMAYNAYSO GALMADA IYO MARKAAD  
BOGTABA**

**XANUUN AAD  
DAREENTO MARKAAD  
SAXAROONAYSO**

## DHIBAATADA UURAYSASHADA

**MA KU SOO MARAY MID KA  
MID AH KUWAN?  
WAXAY NOQON KARTAA  
ENDOMETRIOSIS  
(XUUB KA SOO DUL BAXA ILMA  
GALEENKA)**

Haween badan oo dhasha iyagoo dhedig ah ayaa kala kulma xanuun markay ku dhacdo caadada, lakiin haddii xanuunkaagu faragelinayo hawlahaad maalinlaha ah aad ayay u fiican tahay inaad **la kulanto dhakhtarkaaga.**

**Khadka caawinta: 0808 808 2227**  
**www.endometriosis-uk.org**

**ENDOMETRIOSIS UK**



# **WAA MAXAY ENDOMETRIOSIS (XUUB KA SOO DUL BAXA ILMA GALEENKA)?**

Endometriosis (xuub ka soo dul baxa ilma galeenka) waa xaalad unugyo lamid ah xuubka ilma galeenka ay kasoo baxaan meel kale oo jirka kamid ah, guud ahaan godka miskaha. Bil kasta unugyadani waxay ka falceliyaan wareegga dhiiga caadada si la mid ah kuwa ilma galeenka ku jira, iyaga oo kordhaya ka dibna kala qayb samaya oo dhiig bixaya Si ka duwan unugyada ilma galeenka oo uga soo baxo jirka sidii dhiig caado ahaan, dhiigani malaha jid uu ka baxo, Tani waxay keeni kartaa olol, xanuun iyo nuda oo isku bedesha nabar (qolof gudaha ku samaysanta).

Astaamaha la soo maraa way kala gadisnaan karaan, iyadoona ku xiran halka uu ka soo baxayo endometriosis (xuub ka soo dul baxa ilma galeenka). Qaar si xun ayuu u saameeyaa, halka dadka kale laga yaabo inaysan yeelin wax astaamo ah oo la ogsoonaan karo. Haddii xanuunkaaga dhiiga caadadu faragelin ku hayso hawlahaaga maalinlaha ah way fiican tahay inaad aragto dhakhtarkaaga.

Endometriosis (xuub ka soo dul baxa ilma galeenka) wuxuu saameeyaa 10% haweenka iyo kuwa ku dhashay dhedignimada laga bilaabo markay qaangaareen ilaa joogsiga dhiiga caadada, in kastoo saameynta ay noqon kartaa mid la dareemo intuu qofka nool yahay - taasi waa wax ka badan 1.5 milyan gudaha UK. Endometriosis (xuub ka soo dul baxa ilma galeenka) maaha caabuq ama kansar dadkuna iskuma gudbin karaan.

## **WAXAAN QABAA ASTAAMO...MAXAAN SAMEEYAA?**

Taageerada la heli karo si ay u caawiso inaad hesho cudur aqoonsasho oo aad maareyso endometriosis (xuub ka soo dul baxa ilma galeenka). La hadal dhakhtarkaaga guud oo u sheeg wax ku saabsan macluumaadka astaamahaaga sida suuragalka ah. Samaysashada qoraalada raadraaca xanuunka iyo astaamaha ayaa kaa caawin doontaa inaad sharaxdo astaamaha aad la kulmayso.

Soo booqo websaydkayaga si aad u ogaato xog dheeraad ah oo ku saabsan endometriosis (xuub ka soo dul baxa ilma galeenka) iyo tilmaamaha markaad la hadlayso dhakhtarkaada guud.

## **SIDEE AYAY IGU CAAWIN KARTAA HAY'ADDA ENDOMETRIOSIS UK?**

Waxaanu haynaa ilo laga heli karo macluumaad oo kala duwan websaydkeena, oo ay ku jiraan xusuus qorka xanuunka iyo astaamaha iyo hagitaanka si ay u caawiso helida cudur aqoonsasho, lagu daray faahfaahinta kooxaha taageerada deegaanka, madasha faran qaynta onlaynka ah iyo khdka caawiimada. .

 Khadka caawinta: **0808 808 2227**

 [www.endometriosis-uk.org](http://www.endometriosis-uk.org)